

Adeegyada Daryeelka Nasinta Qorsheysan ee Habeenkii

Guudmarka

Adeegyada Daryeelka Nasinta Qorsheysan ee Habeenkii waa adeeg bulshada ku saleysan oo loogu talagalay dadka waaweyn ee ay uu diiwaangeliyay Maamulka Naafonimada Koritaanka ee la nool daryeelayaashooda asaasiga ah. Adeegga wuxuu bixiyaa nasasho laga nasanayo daryeelka wuxuunna bixiyaa hawlo gaar ah iyo taageero loo fidiyo macmiilka. Adeegyada waxaa lagu bixiyaa goob bulsho (guri ama abaarman) waxaanna ka shaqeeya adeeg bixiyeyaal qandaraas lala soo galey, oo la aqoonsan yahay.

Goobta daryeel nasin kasta waxay u adeegaysaa hal qof waqtigiiba, iyadoo la adeegsanayo qorshe uu xuddun u yahay qofka oo lala sameeyay daryeelaha aasaasiga ah si loo abuurdo jadwalka hawlaha ka soo baxa baahiyada qofka. Macaamiisha waxay heli karaan ilaa 14 maalmood oo nasasho ah sannad kaaladarka.

Goobaha Daryeelka Nasinta Qorsheysan ee Habeenkii ayaa ka jira gobolka oo dhan oo ay ku jiraan Spokane, Bellingham, Lynnwood, Tacoma, Olympia iyo Vancouver. Waxaan fududeynay ku dhowaad 276 joogitaanno daryeel nasin qorsheysan oo habeenkii ah sannad maaliyadeedka 2023.

Awoodda

[Cutubka 388-823 WAC](#), go'aaminta xaq-u-yeelashada iyo qaadashada ee Maamulka Naafonimada Koritaanka

[Cutubka 388-829R WAC](#), Adeegyada daryeelka nasinta qorsheysan ee habeenkii

Miisaaniyad

Sharci-dejiyaha wuxuu maalgeliyay sideed sariiro oo loogu talagalay daryeelka nasinta oo ay bulshadu leedahay sannadkii 2015 iyadoo loo marayo ESSB 6052. Waxaan hadda ku leenahay sagaal goobood oo OPRS ah guud ahaan gobolka. Miisaaniyadda 2023-2025 waxay inoo oggolaanaysaa in aan qandaraas ku bixinno ilaa 12 sariirood.



Xaq-u-yeelashada

Shakhsiyaadka:

- Xaqa u leh adeegyada DDA.
- 18 sano jirka ah ama ka weyn.
- Guriga kula nool daryeelaha aasaasiga ah ee aan hadda helaynin adeegyada baxnaaninta degaanka ee waafaqsan ka-tanaasulidda Core, haddii:
 - Aad adeegyo ka helayso bixiyaha wehelka ama saaxiibka ah; ama
 - Aad helayso adeegyada degaanka ee Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice).

Ka-qaybgalayaasha waa in ay sidoo kale aqoonsadaan daryeela taakule ah haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah haddii daryeelaha aasaasiga ah aan la heli karin.

Bah-wadaagta

- Shakhsiyaadka adeegyada helaya.
- Qoysaska iyo daryeelayaasha aasaasiga ah ee ka-qaybgalayaasha barnaamijka.
- Uurrada u-qareemeynta.
- Bixiyayaasha Adeegyada Daryeelka Nasinta Qorsheysan ee Habeenkii ee la aqoonsan yahay.

Kormeerka

- Xafiiska DDA ee Tayada, U-hoggaansamidda iyo Tababbarka.
- Xafiiska DDA ee U-hoggaansamidda Adeeg-bixiyaha iyo Tayo Hubinta Kala-guurka.
- Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn ee DSHS.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.